

Masuuliyaadkaaga iyo xuquuqdaada

Dukumintigaani wuxuu sharxayaa waxaad naga filan karto iyo waxaanu kaa filayno markaad isticmaalaysa adeegyadayada.

Waxaad naga filayso

Ixtiraam

- Waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo si ixtiraam iyo sharaf leh.
- Waxaad xaq u leedahay inaad naga codsato inaan ku siino daryeelka kaas oo kaa caawiya inuu daboolo baahiyahaaga dhaqaneed iyo kuwa diimeed. Waxaan isku dayi doonaa inaan daboolno baahiyahaaga haddii aanan awoodina waxaan kuu sharxi doonaa sababtaas.

Wada-xiriirka

- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho macluumaad ku saabsan adeegayaga, daawaynta, daryeelada kala duwan si cad oo furan.
- Waxaa laga yaabaa in aad su'aalo na weydiiso.
- Waxaad weydiisan kartaa mutarjum haddaad u baahan tahay mid.
- Waxaan samaynayaa wixii karaankayaga ah si aan kuu siino macluumaad si aad u fahmi karto oo sahlan.



Ka qaybgalka

- Waxaad xaq u leedahay inaad ka qaybqaadato go'aanada aadna go'aan ka samayso wixii la xiriira caafimaadkaaga. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaad doonayso in go'aanka ay lug ku yeeshaan qoyskaaga, saaxiibadaa ama dad kale oo ku kaalmeeya wixii ku saabsan daryeelkaaga.
- Xaalladaha badankood, waxaad awoodaa inaad diido daryeelka haddii aad doonayso inaad qaadato.
- Waxaa laga yaabaa inaad jeceshahay inaad ka qaybqaadato qayb ka mid ah barnaamijyadayada cilmi baarista ama ardada ama tababarka ardada. Waxaanu ku weydiin doonaa arrintaan haddii aadan doonayn maaha inaad ka qaybqaadato.

Amaanka

- Waxaad xaq u leedahay inaad amaangasho markaad qaadnayso daryeelka. Waxaanu xaqiijin doonaa in dhamaan daaweyntayada iyo tas-hiilaadku ay yihiin nadiif iyo amaan.

Helitaanka

- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho daryeel caafimaad oo aad u sarreeya.
- Waxaanu ku siinaynaa daryeel gaara iyo guud. Daryeelka guud ama dadweyne waxaa lacagtiisa bixiya xukuumada. Haddii aad leedahay caymis caafimaad oo gaara, waxaad dooran kartaa daryeel gaara.

Gaarnimada

- Waxaad xaq u leedahay barayfasigaaga gaarka ah, kuwaas oo ay ku jiraan qarsoodinimada macluumaadka caafimaadkaaga.

Wax ka dhahid

- Waxaad xaq u leedahay inaad wax ka tiraahdo daryeelka caafimaadkaaga. Waanu ka jawaabaynaa welwel kasta oo aad qabto.



Haddii aad u baahantahay turjumaan, Fadlan aan la socono: 131 450

Waxaanu kaa filayno

Ixtiraam

- Waxaanu kaa filaynaa inaad ula dhaqanto shaqaalahayaga, bukaanada, daryeelayaasha, qoysaska iyo booqdayaasha si ixtiraam iyo sharaf leh.

Wada-xiiriirka

Fadlan noo sheeg wax kasta oo ku saabsan caafimaadkaaga. Tan waxaa ku jiri karta:

- Taariikhdaada caafimaad
- Kaalmada qoyska iyo bulshada
- Daawa kasta oo aad qaadanayso
- Sida aad dareemayso naftaada
- Daawayn kasta oo siyaada ah
- Hanaan nololeedkaaga iyo aaminaada dhaqan

Haddii aadan u hadli karin naftaada, waxaad weydiisan kartaa in qof ku caawimo.

Ka qaybgalka

- Fadlan ka qaybgal daaweynta. Taas macneheedu waxa weeye weydiinta su'aallo iyo kala doorashada wixii ku saabsan daaweynta iyo daryeelka.

Amni

- Waxaanu kaa filaynaa inaad ula dhaqanto tas-hiilaadkayaga si taxadar leh aadna ilaaliso nadaafada iyo amaanka. Waxaanu ku weydiisanaynaa inaad raacdo shuruucda iyo awaamiirta. Waxaanu ku weydiisanaynaa in aadan cabin sigaar markaad joogto mid kasta oo ka mid ah tas-hiilaadkayaga.

Gaarnimada

- Waxaan kaa filaynaa inaad ixtiraami doonto barayfasiga dadka kale.

Miyaad qabtaa wax cabashooyin ah?

Waxaan doonaynaa fursad aan ku xallino wixii cabashooyin ah oo aad qabto sida ugu dhaqsaha badan. Haddii aadan ku qanacsanayn waayo-aragnimadaada Monash Health, fadlan nagala hadal:

Tallaabada 1aad: La-hadal xubinta shaqaalaha oo ku daryeelaya


Tallaabada 2aad: Weydii inaad la hadasho kalkaaliyaha masuulka ah

Tallaabada 3aad: Haddii cabashadaada aan la xallin, ama aadan ku faraxsanayn la-hadlidda shaqaalaha woodhka, waxaad la xiriiri kartaa mid ka mid ah Sarkaalka U-qaybsanaha Macmiilaha:

Monash Medical Centre	9594 2702	Casey Hospital	8768 1465
Monash Children's Hospital	9594 2702	Cranbourne Centre	8768 1465
Dandenong Hospital	9554 8078	Mental Health	9554 9237
Moorabbin Hospital	9928 8584	Monash Health Community	9554 9376
Kingston Centre	9265 1000		



Sidaas baddalkeeda, waxaad ka eegi kartaa website-keena waxaad na siin kartaa warcelin:
www.monashhealth.org



Ama noo soo qori kartaa::
Cabashooyinka iyo Ammaanaha
Monash Health Locked Bag 29
Clayton South VIC 3169

Haddii aanan awoodin inaan xallino cabashadaada, waxaad la xiriiri kartaa "Komusaariyaha Cabashooyinka Caafimaadka":



Level 26, 570 Bourke Street
Melbourne VIC 3000
Telephone: **1300 582 113**
Website: www.hcc.vic.gov.au

Qiyamkeena:



Daacadnimo, Naxariis, Masuuliyad, Ixtiraam, Heer-Sarrayn.
Haddii aad u baahantahay turjumaan, Fadlan aan la socono: 131 450